

Warbixin ku socota waalidka iyo ardayda kuna saabsan baaritaanka macluumaadka dhallinyarada (Ungdata-undersøkelsen)

Waxaa sanadkaan dugsiga ilmahaaga ka dhici doona baaritaanka macluumaadka dhallinyarada. Dhammaan ardayda dugsiga dhigata iyo degmada ayaa lagu casumay in ay baaritaanka ka qaybqaataan. Gu'ga dhexdiisa ayaa baaritaanka iskoolka lagu qaban doonaa. Ujeeddadu waa in la ogaado sida ay tahay xaaladda carruurta iyo dhallinyarada, iyo waxyaalaha ay qabtaan wakhtigooda firaqada ah.

Ujeeddada baaritaanka

- In ay carruurta iyo dhallinyaradu helaan fursad ay siyaasiyiinta deegaanka iyo mas'uuliyiinta ugu gudbiyaan sida ay tahay ku-korista degmadu.
- La helo aqoon loo adeegsan karo hawlaha degmada ee sare loogu qaadayo xaaladda korriinka ee carruurta.
- La helo cilmibaarid muddo dheer wax badan looga ogaado xaaladda korriinka ilmaha ee heer deegaan iyo heer qaran.

Maxaan kugu weydiin doonaa Macluumaadka dhallinyarada?

- Saaxiibbada, wakhtiga firaqada la yahay iyo isticmaalka saxaafadda
- Qoys, iskool iyo bey'adda kuu dhow
- Caafimaad, ka-helitaan iyo tayada noloshu
- Dhibidda
- Jinsi iyo fasal

Dugsiyada dhexe waxaa kale oo aan weydiinnaa:

- Jebinta xeerarka iyo isticmaalka maandooriyaha
- Gacanqaadka iyo dadka dhibidda
- Heerka waxbarasho ee waalidka

Sidee ayaa loo fuliyaa Macluumaadka dhallinyarada?

- Hal xisad ayaa loogu tala galay in baaritaanka laga jawaabo, qof weyn ayaana goobjoog ka ah.
- Baaritaanku wuxuu u dhacaa si elegtaroonig ah ayada oo bogga jawaabta ee Macluumaadka dhallinyarada lagu gelayo fure aan horey loo sii aqoon oo hal mar shaqaynaya. Furaha laguma garan karo qofka jawaabay.
- Ardaydu waxay jawaabayaan ayaga oo istilaab saaraya foomka su'aalaha.
- Qofki doonaya waa loo akhrin karaa su'aalaha iyo jawaabaha foomka foomka su'aalaha. Laakiin markaas waa in qofku haystaa xargaha dhegaha la gashado ee wax lagu dhegaysto.
- Ardada qaar baa u baahan kara in wax loo fududeeyo si ay uga qaybqaataan. Waxaa iskoolka loo sheegay habab kala duwan oo wax-fududayntaas loo samayn karo.

Diyaargaraw

Adeegga caafimaadka ee dugsigu diyaar ayuu u yahay ardaydii caawin u baahata baaritaanka kaddib

Xor ayaa loo yahay in laga qaybqaato

- Ardadu iyagaa dooranaya inay ka qaybqaadanayaan iyo in kale.
- Dadka ka jawaabaya way ka boodi karaan su'aalaha aysan doonayn in ay ka jawaabaan, haddii ay rabaanna ayaga oo dhexda maraya ayay isaga hari karaan.

Oggolaashada waalidka

- Adiga waalidka ah ayaa go'aaminaya inuu ilmahaagu baaritaanka ka qaybqaadanayo iyo in kale.
- Haddii aad doonayso inuu ilmahaagu ka qaybqaato, waxba lagaagama baahna inaad samayso
- Haddii aadan doonayn inuu ilmahaagu ka qaybqaato, waa inaad taas macallinka xiriiriyaha ah/iskoolka u sheegtaa ka hor intaan baaritaanku billaaban.

Ilaalinta macluumaadka qofka

- Baaritaanku waa qarsoodi. Suurttagal ma aha in qofka gaarka ah laga garto macluumaadka la soo aruuriyay.
- Si qarsoodi ah oo adag ayaa loo haynayaa jawaabaha oo dhan.

Mas'uuliyadda baaritaanka

Baaritaanka waxaa fulinaya Machadka cilmibaarista samafalka NOVA ee OsloMet – jaamacadda magaalada weyn iyo xarunta aqoonta sakhradda ee gobolka (KORUS), ayaga oo shaqada u qabanaya degmada.

Meesha lagala xiriirayo

La xiriir dugsiga ama KORUS si ay warbixin dheeri ah kaaga siiyaan baaritaanka.

Waalidka doonaya in loo soo diro foomka su'aalaha oo ku qoran afingiriis ama afnorwiji waxay la xiriiri karaan KORUS

[Warbixin intaan ka badan oo baaritaanka ku saabsan waxaad ka helaysaa bogga internetka ee Macluumaadka dhallinyarada](http://www.ungdata.no/informasjon-til-ungdom-og-foresatte/)
<http://www.ungdata.no/informasjon-til-ungdom-og-foresatte/>